

Hagaha dib-u-warshadaynta



Baro alaabaha aad dib-u-warshadayn karto

Dib-u-warshadaynta alaabaha waa hab sahlan oo habboon hoosna loogu dhigayo qashinkaaga iyadoona lagu difaacayo deegaanka. Ka qayb qaado inaad barato alaabaha aad dib ugu warshadayn karto iyo sida loo bilaabo ama loo hagaajiyo dib u warshadaynta alaabaha ee lagu sameeyo gurigaaga, kondhomkaaga, ama dabaqaaga.

Alaabaha aad dib-u-warshadayn karto

Alaabta soo socota ayaa dib loogu warshadayn karaa gaadhigaaga dib-u-warshadaynta ama weelka qashinka. Dhammaan shirkadaha qashinka ka qaada ee aagga Metro ee Twin Cities waxay isticmaalaan liis kan lamid ah.

Dhalooyin caag ah, jeegaga caaga, koobabka, weelasha ka samaysan caagaga

Dib-u-warshadee caagadaha # 1, 2, 5
Daboolada ku dhaaf



Maya: Bacaha balaastikada ah ama filmada, baqshadaha alaabada lagu qaado #6, balaastikada, balaastikada madow, Styrofoam™, weelasha ay ku jiraan walxaha halista ah

Warqad, sanduuqyo, kartoono
Sanduuqyo fidsan



Maya: Istiraashooyinka, tuwaalada waraaqaha, saxannada warqada ka samaysan, tubbada jalaatada, koobabka qaxwada

Dhalooyinka dhalada ah iyo qulucyada



Maya: Dhalooyinka cabitaanka, pyrex, ubada, muraayadaha

Gasacadaha birta ah



Maya: Daasadaha rinjiga, dhululubada propane, taangiyada helium-ka, weelasha ay ku jiraan walxaha halista ah

Kaartoona

Ha fidinin



Maya: Warqad ama kartoonnada ukunta ee Styrofoam™, tuubooyinka jalaatada

Ka bilaabida ama horumar ka samaynta dib-u-warshadaynta alaabaha ee lagu sameeyo gurigaaga, kondhomkaada ama dabaqaada



Adeeg dib-u-warshadaynta alaabaha ayaa looga baahan yahay guryaha, kondhomyada, iyo dabaqyada. Haddii aadan heli karin dib-u-warshadayn alaabaha ama aad u malaynayso in dhismahaagu u sameyn karo dib-u-warshadaynta alaabaha si wanaagsan, dawlada hoose ayaa ku caawin karta. La xidhiidh dawladaada hoose si aad u codsato caawimo iyo agabyo bilaash ah.




Ka ilaali bacaha aalada dib-u-warshadaynta

Ku rid dib-u-warshadaynta iyadoo dabacsan gaarigaaga dib u warshadaynta ama weelka qashinka.

Ha ku ridin bacaha balaastikada ah ama dib u warshadaynta la xirxiray gaadhigaaga dib u warshadaynta ama weelkaaga qashinka.

Ku ridida waxyaabaha dib loo warshadayn karo bacaha balaastikada ah kama dhigna in alaabaha dib loo warshadeeyay.

Ma hubtid miyaa sida qashin loo asturo? Hubi Hagaha Qashin-qubista Cagaaran



Hagaha Qashin-qubista Cagaaran ayaa kaa caawin doona inaad ogaato dib u isticmaalida, dib u warshadaynta, iyo doorashooyinka qashin qubista ugu fiican ee alaabaha inta badan la isticmaalo, oo ay ku jiraan alaabta guriga, furaashyada, iyo TV-yada. Ka raadi hagaha barta hennepin.us/green-disposal-guide